MAXAA LAYGA RABAA INAAN HADII OGAADO BARNAAMIJKA DACA UU

Allison Davenport, Lena Graber, Sally Kinoshita

Waxaa jira warbixino sheegaaya in Madaxwayne Trump uu baabi'in rabo barnaamijka Difaaca dadka Caruurnimada Kusoo gala (DACA) goor dhaw. Xiligan, manaqaano goorta iyo hadii barnaamijka DACA lajoojin doono iyo sida joo jinta barnaamijka uu noqonaayo. Tusaale, dadka DAC kujira wali ma awoodi doonaan inaan latarxiilin mana isticmaali karaan ogolaanshahooda shaqo ilaa uu kadhaco? Ama DACA waa la ansixin doonaa ogolaanshiyaasha sharcina waa lagala noqon doonaa? Inta barnaamijka DACA uu shaqaynaayo waqtigaan, hoos waxaad kahelaysaa waxyaabaha aad niyada kuhaynayso hadii barnaamijka la baabi'iyo.

I. Ogolaanshiyaasha Shaqada

Dukumiintiyada ogolaanshaha shaqo (EADs), sidoo kale looyaqaano ogolaanshiyaasha shaqada, caadiyan waa kuwo shaqaynaaya ilaa ay kadhacaan ama dawladu codsato in lasoo celiyo. Ilaa dawladu kaa codsato inaad sooceliso ogolaanshiyahaaga shaqada, qodobada soosocda ayaa saamaynaaya.

- Hadii barnaamijka DACA uu dhamaado laakiin laguu daayo inaad haysato ogolanshiyahaaga shaqo, waxaad xaq uleedahay inaad shaqayso ilaa ogolaanshahaaga shaqo uu dhaco.
- Xataa hadii barnaamijka DACA dhamaado, waajib kaama saarna inaad usheegto qofka aad ushaqaynaysid in barnaamijkii DACA dhamaaday. Qofka aad ushaqayso xaq uma laha inuu kuwaydiiyo inaad DACA kujirto ama sida aad kuheshay ogolaanshahaaga shaqo.
- Qofka aad ushaqayso xaq uma laha inuu kucayrsho, oo kaadhigo qof shaqada katagaaya, ama uu badalo goobtaada shaqo ilaa ogolaanshahaaga shaqo uu kaadhaco. Hadii taarikhda uu kaadhacaayo ay dhawdahay, qofka aad ushaqayso wuxu kuwaydiisan karaa ogolaanshaha shaqada inaad cusboonaysiisato laakiin wax talaabo ah kaama qaadi karo ilaa ogolaanshahaaga uu kaadhaco.
- Si aad uhesho macluumaad dheeri ah oo kusaabsan xuquuqdaada kashaqaale ahaan fiiri Macluumaadkaan Talosiinta ah ee Xarunta Sharciga Socdaalka Qaranka: https://www.nilc.org/issues/daca/daca-and-workplace-rights/.

II. Nambarada Amaanka Bulshada Social Security Numbers (SSNs)

SSN kaaga waa nambar SSN oo sharci ah waligiis, xataa hadii ogolaanshaahaga shaqo iyo aqbalaadaada DACA ay dhamaadaan.

- Hadaadan sidaas horay usamayn, codso SSN inta DACA haaga iyo ogolaanshahaaga shaqo aysan dhicin.
- Waad isticmaali kartaa waana inaad siiwadaa isticmaalka SSN kaaga aad kuheshay DACA inuu sii ahaado SSN xataa marka ogolaanshiyahaaga shaqo uu dhaco. Waxaad u adeegsan kartaa SSN kaaga waxbarashada, bangiga, guriga iyo ujeedooyinka kale.
- SSN kaaga wuxuu ka kooban yahay shuruud kuxiran taasoo ubaahan inaad haysato ogolaansho shaqo oo shaqaynaaya si aad ugu adeegsato arimaha shaqo.

III. Liisanada Darawaliinta iyo Kaarrka kale ee Aqoonsiga

Xaq uyeelashada sharciyadaan waxay kuxiran tahay gobalka aad dagan tahay. Hadaadan horay uhaysan, codso liisanada darawalka iyo kaarka aqoonsiga gobalka hadii DACA haga uu wali shaqaynaayo taasoo xaq kuu siinaysa inaad hesho liisanka gaariga ama kaarka aqoonsiga gobalkaaga.

IV. Safarka dadka haysta Advance Parole

Dadka haysta DACA waa inay kafoojignaadaan udhoofida dibada kuna dhoofaa advance parole (ogolaansha shaqo ee dadka aan muwaadiniinta ahayn).

- Hadaad joogto dibada adoo haysta ogolaanshaha, waa inaad isla markaba soo noqotaa inta advance parole lahaaga iyo EAD gaaga ay wali shaqaynayaan. Hadii barnaamijka DACA uu dhamaado, macada in dadka haysta advance parole laha ay kuheleen DACA ay awood uyeelan doonaan inay wadanka kusoo noqdaan. Jidka ugu wanaagsan waa inaad sida ugu dhakhsiyaha badan kusoo laabataa, kahor intaan lagu dhawaaqin in DACA lajoojiyay.
- Hadii advace parole lagugu siiyay DACA laakiin aadan wali kabixin Maraykanka, ama aad doonaysid inaad codsato advance parole, lahadal xeer ilaaliyaha si aad u ogaato halisaha kuxeeran kahor intaadan waxkale samayn.

V. Dookhyada Kale ee Soogalootiga

Dad badan oo haysta DACA waxay xaq uyeelan karaan dookh kale oo soogalootinimo si ay kuhelaan ogolaansho shaqo ama green card.

- Lahadal adeeg bixiye kamid ah adeegyada socdaalka si aad ufahanto dookhyadaada sharci iyo hadii aad heli karto faaiido kale oo soogalootinimo. Raadi adeegyada sharci ee socdaalka oo raqiis ah: https://www.immigrationlawhelp.org
- Iska jir adeeg bixiyaasha wax khiyaana: hubi aqoonsiyadooda, waydiiso heshiis qoran iyo risiidka lacag kasta oo aad siiso, hadii aad tuhun kaqabtana, qolo kale raadso.

VI. Arimaha Danbiga

Wixii xiritaan danbi ah, eedayn, ama xukun waxay halis kugu galinayaan maamulada socdaalka.

- Iska jir inaad lahadasho laamaha ciidanka kaasoo keeni kara in danbi lagugu xiro. Hadii lagu xiro, latasho xeer ilaaliye khabiir ku ah arimaha socdaalka.
- Hadii lagugu rido xukun danbi, raadi hadii lakhafiifin karo si loo yareeyo samaynta mustaqbalka kiiskaaga socdaalka ee aad gali karto.

VII. Baro Xuquuqdaada

Qofkasta - kuwa dukumiintiyada haysta iyo kuwa aan haysan labaduba waxay xaq kuleeyihiin wadankaan. Dhamaan waqtiyada, qaado kaarka gaduudan si aad u isticmaasho xaqa aad uleedahay inaad aamusnaato hadii ay kuqabato ama suaalo kuwaydiiso ICE (https://www.ilrc.org/red-cards).

Waxaad leedahay xuquuq Dastuuri ah:

- HAFURIN ALBAABKA hadii sarkaal kasocda laanta socdaalka uu albaabkaaga soogaraaco.
- WAX SUAALO AH HAKA JAWAABIN hadii uu kuwaydiiyo

sarkaal socdaalka kasocda haduu isku dayo inuu kula hadlo. Waxaad xaq uleedahay inaadan hadlin.

- WAXBA HASAXIIXIN adoon marka hore lahadlin qareen. Waxaad xaq uleedahay inaad lahadasho qareenka.
- Hadaad kamaqantahay gurigaaga, waydii sarkaalka inaad bixi karto haduu kudhaho haa, si dagan ubax.
- **SII KAARKAAN SARKAALKA.** Hadaad gurigaaga joogto, katus kaarka daaqada ama albaabka hostiisa katus.

Madoonaayo inaan kulahadlo, aan kajawaabo suaalahaaga, ama aan saxiixa ama aan kuudhiibo wax dukumiinti ah ano raacaaya xuquuqdayda 5TH Amendment ee Dastuurka Wadanka Maraykanka.

Kuuma ogoli inaad gurigayga soo gasho anoo raacaaya xuquuqda 4th Amendment ee Dastuurka Maraykanka ilaa aad sooqaadato ogolaansho aad kusoo gasho, kaasoo uusaxiixay xaakim ama garsoore oo magacaygu kuqoran yahay aadna kasoo tuurto albaabkayga hoostiisa.

Kuma siinaayo ogolaansh ad kubaarto alaabtay sida kucad xuquuqda 4th amendment.

Waxaan doonayaa inaan isticmaalo xuquuqday dastuuriga ah.

Kaararkaan waxaa haysan kara muwaadiniinta iyo kuwa aan muwaadiniinta ahayn si iskumid ah

VIII. Wixii soo kordha iyo Macluumaadka

Lasoco wararka si foojignaan leh oo gal meelaha laga helo wararka runta ah ee kusaabsan xaalada DACA iyo barnaamijyada kale ee socdaalka. Dabin ha ugalin khaainiinta inay kaadalbadaan lacag cusub ama macluumaad been ah oo kusaabsan ogolaanshaha shaqada ee DACA. Meelaha wararka runta ah laga helo waxaa kamida www.unitedwedream.org, www.informedimmigrant.com, www.defenddaca.com, www.ilrc.org, www.nilc.org iyo www.weareheretostay.org.